



MUHIIM: Waa La Joojiyey Qeybtii Cuntada Maanta oo Jimco ah

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ah ee PPS,

Maadaama ay tay'ada hawadu ay wali hoos u sii dhacayso ilaa ay gaartay heer caafimaadka khatar ku ah ayna sababtay in hawlihii dibada lagu qabanaya ayna suurtagal ah, **waxa aanu joojinay addeegii cunto qeybtinta ee maanta oo (Jimco ah).**

Dhammaan hawlihii kale ee ku salaysanaa goobaha waa la BAAJIYAY, sidii aan hore u idiinla socodsiinay. Dhammaan dhismayaasha iskuuladu waa xiran yihiin. Waxbarashadii guryaha lagu qaadanayey waxa ay u soconaysaa sidii loogu talagalay, iyada oo ay tahay maalintii ugu dambaysay ee jadwalkeena bilowga ah ee macallimiinta iyo ardaydu ay ku wada shaqeynayeen dhinaca online.

Mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee aan qabaana waa addeega cuntada ee aan gaarsiino ardeydeena. Xaaladda xanuunka darteed, suurtagal maaha inaan fulino addeegii cuntada in aan ku qeybino gudaha dhismayaasha. Go'aankayaga ah in la joojiyo qeybintii cuntada maanta waxa weeye walaac aan ka qabno anaka oo eegeyna dhinaca caafimaadka ardaydeena, qoysaskeena iyo shaqaalaheenaba.

Waxa aan ka war qabnaa in shaqaale badan oo ah shaqaalaheena iyo qoysaska ay saameyneyso dhinacyo fara badan dabkani baabi'iyey gobolkeena. Waxa aanu ka warwareynaa qof kasta oo ay waxyeelo ka soo gaartay.